



## Warqadda Waalidka "Lilo Lausch" - Soomaali

Ma nabad baa! Waad ku mahadsantahay daqiiqadaha yare ee ad qaadaneeso, waxaan jeclaan lahaa inaan ku baro gabadh maroodi oo qurux badan "Lilo Lausch". Lilo waa boonbalaha gacanta- oo leh dhego waaweyn. Ilmahaaga iyo Lilo waxay waqtii badan ku qaadan doonaan dhageysiga carruurtta xarunta maalin xannaanada sannadka soo socda.

Sababtoo ah dhagaysigu waa furaha dadka kale - furaha adduunka. Haddii aad si taxadar leh u dhageysato, waxaad ogaan kartaa wax badan: ee dabiiciga iyo guriga. Markaan maqalno cod, waan aqoonsannaa waana ogannaax waxa ay ka dhigan tahay. Waaan baranaa heeso cusub oo waxaana isla samayn karnaa muusig marka aynu is dhageysano.

Oo keliya waxaan barannaan luuqad haddii aan si wacan u dhageysan karno: Erayga mxuu yahay, sidee loogu dhawaaqay, sidee loo xoojiyaa, maxuuse macnahiisu yahay? Luqad kasta waxay leedahay codadkeeda gaarka ah, israac-raaca iyo laxanka. Carruurtu waxay bartaan luuqada waalidkood iyaga oo si taxadar leh u dhegeysta oo ku dayda iyaga. Waxay dareemaan dareenka ama xaalada waalidkooda sababtoo ah waxay maqli karaan ereyada gaarka ah ee la xoojiyey oo si adag loogu dhaqaaqay ama si tartiib ah. Sidoo kale waxay bartaan luuqadaha kale iyaga oo u dhageysanaya si taxadar leh oo ku hadlaya erayada.

Marka aad dadka dhagaysato, waxaad baran kartaa inaad fahamto. Kadib waxaad ogaanaysaa waxa ay yiraahdaan, waxa ay ka wadaan, waxa ay dareemaan iyo waxa saameyn ku yeesha. Kaliya marka qofka uu fahmo waxa dadka kale ay yiraahdaan ayuu qofka baran karaa waxyaabaha xiisaha leh ee nolosha - guriga, xannaanada ama gadaal danbe dugsiga dhexdiisa. Ilmahaagu si fudud ayuu wax u baran doonaa, wuxuu baran doonaa waxyaabo cusub wuxuuna soo saari doonaa macluumaad muhiim ah - markaa dhageysigu waa aasaaska waxbarashadiisa.

Laakiin dhegeysigu ma aha mid sahlan. Isagu iskama imaado. Waa inaad ku dhaqantaa si aad ugu wanaagsanaato. Taasina waa sababta "Lilo Lausch" aay ugu jiri doonto xarunta maalin xannaanada ee ilmahaaga mustaqbalka dhow. Waxay haysataa sanduuq buugag ah, ciyaaraha iyo buugaagta dhagaysiga oo ku qoran luuqado badan: tusaale ahaan, af Jarmal, Turki, Ruush, Polish iyo Carabi. Iyaga markay heestaan, carruurtu waxay u muraajceen karaan dhagaysiga si

taxaddar leh.

"Lilo Lausch" waxaa sameeyay Stiftung Zuhören. Markuu heesto "Lilo Lausch" ilmahaagu wuxuu ogaan doonaa inta xiisa ay u leedahay in wax la dhageysto: Tusaale ahaan, isaga oo ay la jiraan carruurta kale waxay raadinayaan dhawaaqyada dugsiga xannaanada, waxay ciyaarayan ciyaaraha dhageysiga ama ay dhegeysanyaan sheekoooyinka ku qoran af jarmalka iyo luqadaha kale. Ka dibna waxay ka hadlayaan waxa ay maqleen. Tani waxay baraysaa cunugaada inuu wax u dhegeysto si taxadar leh oo diiradd leh, barto ereyada cusub, oo uu ku dhaqmo luuqadda si uu ugu muujiyo waxa ay dadku kale rabaan inay ku xiriiraan.

Haddii aad ku hadasho luuqad aan ahayn Jarmalka qoyskaaga dhexdiisa, ilmahaagu wuxuu u sheegi karaa carruurta kale waxa loo yaqaan shayyaasha luuqada qoyskooda. Carruurtu inta badan way jecel yihiin dhawaaqyada ajnabiga ee luqad kale. Sidii iyada oo ah la yaab, waxay bilaabaan inay tijaabiyaan, isku dayaan dhawaaqyada, inay matalaan laxamada luuqada. Aad ayay ugu wacnaan doontaa carruurta oo dhan in ay akhriyaan laxamda ama heesooyinka luuqadaha kale: Waxay murajaceeyaan dhegeysiga waxayna bartaan wax cusub. Carruurta leh luqada qoyska oo ka duwan Jarmalka, waxaa aad muhiim u ah in ay sidoo kale in badan ku hadlaan luqaddan koowaad. Kaliya haddii aad si fiican ugu hadashid luqadda qoyskaaga, ayaa sidoo kale si fiican u baran kartaa jarmalka.

Marka uu ilmahaagu kaala hadlo khibrada uu isaga/iyyada u leedahay Lilo Lausch ee maalin xannaanada, hubi inaad dhageysato oo aad iyada kala hadasho. Adigana waxaa lagugu casuumayaa inaad nafsat ahaantaada ogaato "Lilo Lausch" iyo inaad ku biirto: Haddii aad jeceshay inaad hees qaado ama sheeko luuqadaada ka sheekeeso xarunta maalin xannaanada, la hadal barayaasha. Waxaa sidoo kale la qorsheeyey in carruurta iyo adiga, waalidiinta, aad la wada imaataan sheeko oo luuqadaha kale ah. Waxaan kugu casuumaynaa inaad ku soo biirto

Maalin xannaanada ayaa si deg deg ah kuugu casuumi doonta habeenka waalidiinta. Waan ku faraxsannahay inaan ku aragno inaad timaado! Ilaa iyo inta laga gaarayo waxaan ku leenahay macsalaamo: "Lilo Lausch", xarunta maalin xannaanadaada iyo Stiftung Zuhören.